Laan qayrta cas

SOMALI



# Baafinta iyo fariimaha laan qayrta cas

RESTORING FAMILY LINKS




*Bijoux Mwamba, 5 jir. Ku socda guriga. Bas caruuri ka buuxdo oo ku socda madaarka Kinshasa. Caruurtu waxa ay u xiisoonayaan soo ka noqoshada safarkooda. Isu imaatanka reeraha caruurahooda ka goay iyada oo uu sababay dagaalkii Kongo (DRC). Sawirqaade: Olav A. Saltbones/Laan qayrta cas*

*Bogga hore: Caruuro ku ciyaaraaya Haiti, 2010. Sawir qaade: Brita Liholm Johannessen/Sawir qaade*

Sannad kasta kumanaan ayaa dadkooda ka luma iyada oo dagaal, dil iyo balaayo ay sababtay.Shaqooyinka muhiimka ah ee laan qayrta cas waa in ay caawiso in dadkaasi ay xiriirkii reerkooda dib u soo celiyaan.

Cid kasta waan caawinaa, jinsiyadkasta, lab/dhedig, da, siyaasad, cunsur iyo diin kasta qofku ha ahaadee.

Adeegu waa 2. Baafinta dadka la waayey iyo gaarsiinta laan qayrta cas ee goobaha boosta caadiga aanay ka shaqayn.

Laan qayrta cas iyo bisha cas waxa ay ka jiraan 186 waddan, waana xiriirkan kaa suurto gelinaaya in dad la daydayo oo la helo.

Buug-yarahan waxa aad ku ogaanaysaa qaabka aad u maraysid si aad xiriirkii qaraabada aad u soo celisid iyo sida aad bisha cas iyo laan qayrta cas ugu soo marin lahayd waraaqda.

Adeega baafinta iyo darista fariimahu waa bilaa lacag

**Xiriirka warbixinta:**

Laan qayrta cas ee Norway
Adeega baafinta
Telefoon: 05003
tracing@redcross.no

Ciwaanka booqoshada:
Hausmannsgate 7
0133 Oslo.

Waxa aad ka sii akhriyi kartaa baafinta
www.rodekors.no/oppsporingstjenesten

## Sharciyada dalbashada baafinta laga samaynaayo laan Qayrta Cas

Laan qayrta cas waxa ay caawisaa dadka xiriirkoodii ka waayey reerkoodii iyada oo ay sababtay dagaal, dirir iyo balaayo. Markaa waxa laga dalban karaa laan qayrta cas in ay bilaabaan kiis baafineed, oo ay ka dhex baaraan isku xirka caalamiga ah ee laan qayrta cas iyo bisha cas.

Foomam gaar ah ayaa tan loo isticmaalaa, waddan kastana isku foom ayaa laga istic maalaa.

Saaxibada dhow iyo qaraabada ayuun baa dalban kara caawimada baafinta. Qofku cid kale uma dalban karo, marka laga reebo mas´uuliyiinta oo samayn kara iyaga oo matelaaya da yarta keligood ah.

Foomka waxa lagu buuxinayaa ingiriisa, si faahfaahsanna waa loo buuxinayaa. Waa in la raaciyo warbixinta ugu badan Haddii warbixintu aanay ku filayn in baafin la sameeyo, foomku waxa uu ku soo noqonayaa diraha.

Marka cid la helo, mar kasta waxa la way-diiyaa in isaga/iyadu ay xiriir la samayn rabaan bafiyihii. Iyo in laan qayrta cas ay shaacin karto warbixin ku saabsan qofkaa. Waxa laga yaaba in qofka la baafinayaa aanu rabin in uu la xiriiro qofka wax baafinaaya, qofka wax baafinaayana tan ha ogaado xiliga baafinta

**Foomka baafinta waxa aad ka helaysa adiga oo ka doonta:**

**Norges Røde Kors**
Telefon: 05003
tracing@redcross.no
ama xafiis goboleedka laan qayrta cas ee ugu dhow halka aad deggan tahay.

**Foomka la buuxiyo waxa aad u diraysaa**

**Oppsporingstjenesten,**
**Norges Røde Kors,**
Postboks 1, Grønland,
0133 Oslo.



## Buuxinta foomka:

### 1. Warbixin ku saabsan qofka la baafinaayo

Magac dhmaystirani dabcan waxa uu muhiim u yahay baafinta hirgalideeda. Wadamada qaar qofku waxa uu leeyahay magac hore iyo magac dambe, halka meelo kale qofku magaciisa lagu daraayo, magaca aabihii iyo magaca awaawgii. Waxa kale oo jira wadamo kale oo isticmaala nidaam qofka la siinaayo magac kale oo sheegaaya qofku meesha ama qabilka uu ka yimid.

Haddi ay jiraan cid foomka lagu baafina-ayooo ku caan ah naanays, waa in lagu qoro foomka.

Magac kasta waxa loo qorayaa sida waddanka hooyo looga qoro. Tani waxa kale oo ay khuseysaa cidda wax baafinaysa ee magacoodii bedelay markii ay Norway yimaadeen si loo siiyomagac hore iyo magac dambe

**Tusaalo:**

- Peter ANDERSSON *(magac hore iyo mid dambe)*
- Juan GONZALEZ HERRER *(magaca hore, aabihii magaciisa dambe ka ugu horeeya iyo hooyo magaceeda dambe ka ugu horeeya)*
- Ali Hassan MOHAMMED *(magaciisa, aabo magaciisa, awoowo magaciisa)*
- Abbas Mohamed MAJED AL-NASRAWI *(magaciisa, aabo magaciisa, awoowo magaciisa iyo qabiilka magaciisa)*

**Taarikhda dhalashada:**

Si la isgaga ilaaliyo khaladaadka, bisha waa in lagu qoro xarfo, 5tii maarso 1985. 5/3 1985 si fudud baa loo khalad fahmi karaa. Norway waxa ay ka dhigan tahay5tii maarso 1985, laakin wadamada kale waxa ay ka dhigan tahay 3dii May 1985. Midda kale waxa jira wakhti xisaabin kale oo teena ka duwan, markasta labada taarikh dhalasho ayaa la raacayaa. Taarikh dhalashada kale ku qor luqadda qofka la baafinaayo haddii alfabeetadu kala duwan tahay.

Haddi cidda wax baafinaysa aanay si sax ah u garanayn cidda la baafinaayo dhalashadooda, ha la sheega uun sannadka uu dhashay qofka laa baafinayaa qiyaastii.
Isaga oo ka horaysiinaaya isugayn ama kala jarid si loo fahmo in dhalashada qofkaasi aan si ficayn loo garanayn.

**Jinsi:**

Sheeg cidda la baafinayaa midka uu yahay nin ama gabar. Markasta ma fududa in qofka jinsigiisa, magaca uun laga garto.

**Goobta dhalashada:**

Tan sida ugu fiican ayaa loo qeexayaa, waxa masalan lagu qorayaa tuulada, magaalada, gobolka, iwm.
Igu dambaynta markasta waa in la magacaabo waddanka.

**Qaran:**
Maanta la baafiyaha qarankiisa/jinsiyadiisa.

**Jinsiyad wakhtigii dhalashada:**
Qofku jinsiyad ka duwan ayuu haysan karaa wakhtigii uu dhashay. Muhiim ayey u tahay baafinta jinsiyadda uu lahaa la baafiyuhu marku dhashay.

**Cunsurka:**
Cunsurkee ayuu la baafiyuhu yahay? Waa maxay afkiisa/afkeeda hooyo? Haddii aan la garanayn cunsurka la baafiyaha, baafintu waddamada badan suurto gal kama aha. Waxa kale oo qori karaa in la baafiyuhu uu ku soo jeedo qolo laga tiro badan yahay ama ka yimid goob gaar ah oo waddankiisa ku taal.

**Qabiil/qaabil hose/jufo/qoys:**
Halkan waxa lagu qoroyaa warbixnta ku saabsan la baafiyaha asalkiisa, iyada oo la isugu xigsiinaayo sida kor ku qoran. Waddamada qaar muhiim ayey u leedahay baafinta.

**Shaqo:**
Qofkaa la waayey muxuu ka shaqayn jiray? Haddii qofku uu ahaa macalin, dareewal bas ama wadaad, dad badan ayaa garan.

**Cinwaankii iyo shaqadii la yaqaanay ee igu dambaysay:**
Xagee ayey ahayd shaqadii ugu dambaysay ee qofka? Masalan miyey ahayd warshad, suuq, kinisad ama dugsi? Waxa ay noqon kartaa goob shaqo oo dad badani garanayaan cidda ka shaqayn jirtay. Haddi qofkuu uu ahaa arday, sheeg jaamacadda ama dugsiga uu dhigan/ay dhigan jirtay.

**Xaaladda guur:**
Qofkaas xaaladiisa guur sidey ahayd?

**Magaca lamaanaha:**
Waa muhiim in aad sheegtid lamaanaha qofkan la waayey.
Cid baa garan karta qofkaas, cidda baafinaysana il warbixineed oo kale ayey u noqonaysaa.

**Aabo iyo hooyo magacyadooda oo buuxa:**
Mar labaad waxa lagu celinayaa in tani ay muhiim yahay.
Magacyada waa in lagu qoro xuruufta laatiinaga iyo xuruufta waddanka hooyo. Waalidka magacoodu waa warbixin muhiim ah.
Haddii waalidka midkood ama labadooda ay dhinteen, waxa la xariiqayaa afargeeska loogu talogalay.

**Khuseysa shaqaalaha ciidanka: Darajo, qeyb, lambarka shaqada:**
Haddii qofka la waayey uu ciidanka ku jiro caawimo weyn ayey noqonaysaa haddii warbixintan isaga/iyada laga helo.



**2. Faahfaahin baafinta ku saabsan:**
Taariikh iyo wararkii ugu dambeeyey ee qofka la baafinaayo:
Goorma ayaa xiriir isugu kiin dambeysa? Qofka la baafinaayo markaa xaguu joogay? Warbixintan sidaad uheshay? Warbixintan ku saabsan qofka la baafinaayo xagaad ka heshay? Xiriirkiinii isugu kiin dambeeyey goorma ayuu ahaa? Warqad (warqaddu xagay ka timid) telefoon (xagee lag soo diray-telefoon lambarkii weli ma haysaa?), e-mail isaga oo qof saddexaad idiin dhaxeeyey? Haddii taasi jirto, qofkan magaciisa iyo xiriirkiisa sheeg.

**Qofka la baafinaayo cinwaankiisii ugu dambeeyey:**
Tani waa warbxin aad u muhiim ah, ahna in si daqiiq ah loo qoro. Si cad u qor waddan, gobolka, magaalada, tuulada, xaafadda, wadoda, guriga lambarkiisa, dabaqa, aqal lambarkiisa iwm. Haddii ay muhiim tahay cinwanka faahfaahi masalan guriga saddexaad ee kinisada bidix ka xiga, madcamka ka soo horjeedkiisa iwm. Warbixinadani waa ka muhiim goobaha dagaalka ee meelo badan oo ka mid ah ay burbureen. Marmarka qaar waxa xitaa sharaxa waddada tusaaya sida magaalada meelaheeda weyn loo soo galo waxa ay tahay caawimo wanaagsan oo la baafiyihii caawinaysa. Samee tilmaan sidii ay laan qayrta cas ama bisha cas ay ciwaanka u iman la haayeen.

Ciwaanada PO boks ma aha ciwaano buuxa, waana in la warbixinda kor lagu sheegay.

**Xaaladihii keenay in xiriirku go´o:**
Isku day in aad samaysid sharaxaad wanaagsan oo ku saabsan wixii dhacay. Maxaa sababay in xiriirkiinu lumo? Yaa ku jiray dhacdadaa? Kuma fila oo keliya in aad qortid «dagaalkii» ama «qaxitaankii Norway» Maxaa dhacay maalintii xiriirkiinu buray? Malinkaa xagee joogteen? Qorshe noocee ah ayuu lahaa la baafiyuhu? Norway miyaa ka wada hadasheen? Suurtogal matahay in qofka labaafinayaa uu ku laabtay gurigiisii, haddii qorshihi fashilmay? Xaggad u maliaynaysaa in uu joogo qofkaa la waayey?

**3. Xubnaha qoyska ee la filaayo in ay la joogaan la baafiyaha:**
Haddii la filaayo in la baafiyuhu uu la joogo xubno ka mid ah qoyska waxa la qorayaa magaca xubnaha qoyskada´da, qaraabonimada la baafiyaha waxa lagu qorayaa ciwaanka. Haddii la filaayo in ay kala guureen – waan in qof kasta loo buuxiyo foom baafineed, qof kasta oo la baafinaayo

**4. Warbixinada dheeraadka ah:**
Ciddi uu u shaqayn jirey ee hore? Dugsigee ayuu dhigan jiray qofkan la waayeey? Masjidkee, kinisadee diin goobeedkee ayuu qofkaa la waayey ku xirnaa? Ma garanaysaa magaca diin madaxeedka? Qorka xiriirka warbixineed iyo ciwaanada. Ma jiraan goobo caan ah oo dhismeyaal ku ag yaala xaafadda qofkaa la waayey? Suug, madaacim iwm.? Sharac sida laan qayrta cas iyo bisha cas ay ciwaanka u soo heli lahaayen.

Warbixinda dheeradka ah oo caawinaysa baafinta waxa lagu qori karaa, warqad dheerad ah.

**5. Xiriiro kale**
Yaa la filayaa in uu warbixin ka hayo qofkii la waayey? Deris? Qaraabo? Tani waxa ay khuseysaa dadka jooga waddanka goobta baafinta laga wado, balse aan ahayn dad waddan kale oo baafiyaha laftiisu uu la xiriiri karo. Warbixintani waxa ay noqon kartaa imid muhiim u leh in qofkii la helo iyo in kale maadamad isutagga ama ICRC ay toos ula xiriiri karan qof garanaaya qofkii la waayey. Sheeg magac buuxa, ciwaano dhamaystiran iyo telefoon lambar.

**6. Warbixin ku saabsan baafiyaha**
Goobahan suu´aalaha ku saabsan baafiyaha ayaa lagu qorayaa, sidii hore ayaa si daqiiq ah loogu qorayaa. Magac iyo ciwaan si cad waa in ay u qornaadan teleefonlambar, mid gaar ah, moobil iyo haddii uu jiro mid shaqo iyo e-mail. Waxa ay isu yihiin baafiyaha iyo la baafiyuhu waa u muhiim shaqada baafinta ee laan qayrta cas iyo bisha cas.

eeya baafiyaha ee Norway uu adkaan karo. Sababtuna waxa ay noqon kartaa in aanu qofku noo soo sheegin ciwaan cusub ama waddankaba ka tegay. Badanaa waxa aan u baahanahay in aan xiriir la samayno baafiyaha. Ogoow in ay Norges Røde Kors (laan qayrta cas ee Norway) u baahantahay bedelidda ciwaanka guriga. Haddii aan xirii ka heli weyno baafiyaha, baafinta halkaas ayaan ku joojinaynaa. Sidaa awgeed ayaan u codsanaynaa magaca qofka xiriiriye ah oo baafiyuhuu oo xiriir joogto ah la leeyahay oo aan la soo xiriir karno haddii marka aan war ka helno qofkii la waayey. Waa in la xariiqo ogolaanshaha la siinaayo laan qayrta cas ee Norway iyo ICRC iyo laan qayrta cas iyo isu tagga bisha cas inta ay ka shaqayn karaan baafiyaha kiiskiisa. Ogolaanshan marka la helo ayey laan qayrta cas iyada oo waafaqsan sharciga ilaalada qofka kaydin kartaa waraaqaha, ku diiwaan gelin kartaana databasekooda. Sidoo kale waa in la siiyo ogolaansho xukuumadaha waddamada la filaayo qofkii la waayey in uu joogo, in lala xiriiri karo. Waddamada qaar ayaa radioga loo isticmaalaa baafinta. Taan waa in la ogolaado, haddii la rabo in magac sheego. Baafiyuhu waxa uu ku saxeexayaa magaciisa taariikh codsiga Haddii baafiyuhu uu ka yar yahay 18 sano mas´uulka ayaa uu saxeexaaya da yarta.

**Warbixin muhiim ah oo ku socota cid kasta oo cid tabaysa caawimona ka rabta laan qayrta cas ee Norway:**
**Røde Kors:** *Laan qayrta cas sir xejin baa ku waajibtay waxa ay u shaqaysaa si waafaqsan sharciga ilaalada shakhsiga warbinna ma siiso dawladaha haddii aanu rabin baafiyuhu.*



*Maalin kadib la kulankii ayyedii. Saddexdii walaalaha ahaa Mulamba (11), Tshaia (7) iyo Majean (6) waxa ay labadoodii waalid. Iminka ayeeyo oo joogto waddanka dhiniciisa kale ayaa kafaaloo qaaday. Sawiradu waa xuususta kaleya ee la taaban karo ee ay aabo iyo hooyo ka haystaan. Sawir qaade: Olav A. Saltbones/Røde Kors*

## Sharciga qaabka loola dhaqmo fariimiha laan qayrta cas

Fariimaha laan qayrta cas waa warqad 2-boog leh- warqad furan- oo loo kala gayn karo xubnaha qoysaska iyo asxaabta waayey fursad kale oo ay ku xiriiraan. Marka dagaalka, dirita iyo balaayada laan qayrta cas ee dawliga ah (ICRC) iyo/ama iyaga oo la shaqaynaaya laan qayrta cas ee gobolka iyo isu tagga bisha cas, way qaabili karan oo sii faafin karaan. Fariimaha waxa la isticmaala marka dagaal, dirir iyo balaayo ay hor istaagto boosdiriddii caadiga ahayd, balse cinwaanka loo diruhun uu yahay mid la garanaayo.

Laan qayrta cas waxa kale oo ay fariin u kala gudbisaa maxaabiista iyo dadka goobaha lagu xiray iyo qaraabadooda.

ICRC waa in ay markasta xukuumadda arrintu taabanaysu ay fasaxeeda haystaan iyo dhexdhexaadka, isla markaa loo ilaaliyo loo diraha fariinta, aad bay muhiim u tahay in fariintu ay tahay mid arrimo shakhsiyeed ka waramaysa.
Sidaa awgeed kuma qornaan karaan wax ka hadlaaya siyaasad, diin aama wax cidaan tilmaamaaya.

ICRC sidaa awgeed waxa ay eegtaa fariimaha oo dhan, waxaanay qarisaa fariimaha noocaan ah. Maadaama fariimaha laan qayrta cas ay yihiin waraaqo furan, xaq bay u leeyihiin dawladda iyo xabsi ilaaliye yaashu in ay akhriyaan warqad kasta.

Caddaymo iyo sawiro kala duwan waa lagu lifaaqi karaa, sida warqadaha guurka, warqadaha dhalashada, kaararka cadday-maha iwm.
Lama diri karo lacag, daawo iyo alaab.

Fariinta waxa loo dirayaa laan qayrta cas ee dawliga ah iyo xiriirka bisha cas ee adduun weynaha. Fooman gaar ah ayaa shaqadan loo isticmaalaa foomankuna waa isku mid waddan kasta.
Foomanka ingiriisa ayuu lagu qori (hadday suurtoga tahay) qoraal kala baxsan iyo warbixinada ugu badan leh. Kuma filna telefoon lambar ama email. Diraha iyo loo diraha ciwaankooda booseed oo dhamay-stiran waa foomka lagu qoro.
Haddii aanu ciwaanku qornayn, dib baa foomka loogu soo dirayaa diraha.

Muddo dheer ayey qaadan kartaa inta faarinta jawaabteedu iman karto. Tani waxa ay ku xiran tahay xaaladda waddanka fariinta la geynaayo. Waxa kale oo dhici karta in loo diruhu aanu rabin in uu soo jawaabo. Arrimahaa ogsoonow intaanad faarinta dirin.

Haddii aanay suurto gal ahayn in loo diraha loo gaarsiyo fariinta, waxa ay ku soo noqonaysaa (Back To Sender), diraha. Waa in markaa laga baaraandego in mar dambe qaab kale lagu faahin karo.

Bilaa lacag ayaa lagu diraa fariimaha.

*Dib u ula kulanka qoyska Dib ula kulanka caruurta qoyskoodii ka lumay dagaal awgiiKongo (DRC).*
*Sawir qaade: Olav A. Saltbones/laan qayrta cas*



**Buuxinta fariimaha laan qayrta cas:**

**MUHIIM:**
Fariinta ingiriisi ayaa lagu qorayaa ingiriisi, xuruuf faahfaahsan. Warqadda lafteeda waxa lagu qori karaa diraha luqaddiisa.

**Diraha**
Halkan waxa lagu qorayaa magaca diraha, taariikhda dhalashada, aabihii iyo hooya-dii magacooda oo buuxa, telefoonka iyo ciwaanka diraha oo dhamaystiran.
Magacyada dadka iyo goobaha waxa lagu qorayaa xuruufta latiinka iyo diraha luqad-diisa.

Sheeg haddii la rabo magaca kale ee ku qoran sanduuqa boostada kuugu timaado. Badanaa boos ayaa nagu soo noqota, wa-ayu ciddii ay ku socotay ayey shaqaalaha boostu waayey. Haddii warqaddaada laga soo jawaabo oo dab naluuku celiyo, waa muhiim in aan hayno xiriiriye Norway deggan aan kaal soo xiriiri karno, si warqa-dii ka timid asxaabtaadi ama saaxiibadaa. Sidaa awgeed waxa aan kaa codsanaynaa in aad xiriir magaciisa sheegtid Norway deggan.

**Loo diro**
Halkan waxa lagu qorayaa loo diraha magaciisa goobta dhalashada, aabihii iyo hooyadii iyo ciwaan iyo telefoon lambar oo dhamaystiran.
Kuma filna telefoon lambar iyo ciwaanka boostada. Ciwaanada oo dhan buuxi.

**Fariinta lafteeda**
Fariinta waxa keliya oo ay ka koobnaan kartaa warbixin shakhsiyeed. Luqadda diraha ayaa lagu qori karaa. Fariinta waxa eegaaya oo qarinayaa ICRC.
Fariinta laguma qori karo arimo siyaasadeed diin ama arrimo ciidan.

**Saxeex**
Waxa aad qoraysaa taariikh, saxeexaysaana fariinta, waxa kale oo aad xariiqaysa in aad noo ogolaanaysaa in aan hayno warbixinta aad na siisay si aan nidaamka laan qayrta cas aan ugu sii gudbino.

RESTORING FAMILY LINKS

# Laan qayrta cas



**Waxa  aad ka helaysa  warbixin dheeraad ah oo ku saabsan laan qayrta cas iyo adeega baafinta:**

www.familylinks.icrc.org
www.rodekors.no/oppsporingstjenesten
tracing@redcross.no

RESTORING FAMILY LINKS